# In tababarte laga ahaado hey'ad dowladeed

Hordhac




Översatt till somaliska

4 Hordhac

6 Sweeden waxaa lagu hogaamiyaa nadaam dimuqoraadi oo ah baarlamaani ah

8 Sidaan ayuu u egyahay qaabka nadaamka dimuqoraadiga ah

9 Howlaha gaarka ah iyo kuwa guud - waa maxay farqiga u dhaxeeya?

10 Qiimayn dowladeed oo wadajirka

11 Ka shaqaynta hay'ad dawladeed

13 Waa sidee in laga shaqeeyo hey’ad dowladeed?

14 In tababarte laga ahaado hey’ad dowladeed

# Hordhac

Doowladda dhaxdeeda waxaa jira shaqooyin badan oo xirfad ubaahan. Qiyaastii 250000 kun oo shaqaale doowladdeed oo aqoon leh ayaa ka shaqeeya maalinka kasta sida jaamacada, dugsiyada sare, karhortaga dambiyadda, shaqalaha dibadda, cashuur uruurinta, iyo shaqala lacg ku bixinta xasiloonida bulshadda, shaqaalaha xafiiska shaqada, shaqaalaha qoorsheenta kaabayaasha dhaqaalaha iyo shaqaalaha arimaha dhaqanka. Iyo kowakale oo badan sida. Xirfadlayaasha cilbaare yaasha, booliska, dambi baare yaasha, shaqaalaha matxafka, duuliyaasha diyaaradaha dagaalka, macallinka fanka, khubarada arrimaha cashuuraha iyo xirfadlayaasha Itga iyo inkale oo badan. Sweden waxaa qiyaastii jira 340 wasaaradood oo doowli ah.

Shanta ugu weeyn wakaaladdaha dowliga ah ee shaqada bixiya waa Booliska, Ciidamada Qalabka Sida, Wakaaladda caymiska, Xafiiska shaqada iyo wakaaladda cashuuraha.

Ushaqeynta dawladda ujeeda deeda wa in lagudhisaa nadaam bulshada ufaa'iidanaayo iyo qof kasta oo dagan Sweden iyo in la dhiso xiriirka Sweden aay la wadaagto dunida. Doowladda oo looshaqeeyo sidoo kale waxeey ka dhigan tahay in la dhaqan galiyo oo la fuliyo sharciyada iyo xeerarka doowlada iyo baarlamaanka soo gaareen.

# Sweeden

## waxaa lagu hogaamiyaa nadaam dimuqoraadi oo ah baarlamaani ah



**Sweden** waa dal dimoqraadi ah oo baarlamaan hogaamiyo. Taas macnaheedu waa in awoodda hogaamin leeyihiin dadka. Doowlada oo looshaqeeyo waa  qayb ka mid ah geedi socodka nadaamka dimoqraadiyada kudhisan.  Adiga ushaqeeya doowladda waxaad  qeeb katahay oo gacan ka geeysaneeysa in waxa dadka iyo dowlada sweeden rabaan la hirgaliyo si dhab ah.

**Sweedhan dadka** ayaa dooranaayo  cidii u matali laheeyd golaha baarlamaanka afartii sanaba mar.

**Baarlamaanka** waxeey doortaan raisulwasare shaqadiisu tahay in uu soo dhiso golaha wasiiradda. Baarlamaanka ayaa iska leh go,aanka ugu sareeyo sweeden. Baarlamaanka shaqadiisa waxaa kamid ah shari sameeyn iyo dajinta miisaaniyad p0osanadeedka dalka.

**Doowlada** ayaa hogaamisa Sweedhan oo iska leh fulinta go'aanka Baarlamaanka iyo soo hindisida sharciyo cusub iyo wax ka badalista shaciyo hore .



Sagerska palatset, Riksbron, Riksdagshuset, Slottet, Stallbron och Regeringskansliet.

Si aay ufududaato  shaqada doowlada , doowlada waxeey leedahay  xafiisyo doowladeed iyo wasaaradda kala duwan iyo wakaalado doowli ah. Doowlada ayaa go,aamineeysa sida wakaaladaha ushaqeey nayaan. Laakin doowlada mafaragaliso qaabka wakaalada shariciga u isticmaalayaan. Dalal badan  waxay leeyihiin wasiiro awood u leh in eey si toos ah u  faragaliyaan shaqada wakaaladaha.  Laakin  Sweedhan sidas ma aha.. Tan waxaa loo yaqaan in aan diidnay  xukun wasiir kaligii ka soo fulay.

Sanad kastaa doowladu waxeey go,aamisaa dhambaalada qoraalka ah ee kusocodo wasaradaha. Dhambaalada doowlada waxaa kuxusan qaabka wasaradaha shaqada u fulinayaan iyo tirada lacagta eey istacmaalayaan.


Doowlada ayaa go,aamisa cida madaxa ka noqoneeysa wasaraddaha. Madaxa wasarada waxaa layirahdaa xoghayaha guud.



Kammaren är samlad för omröstning.

## SIDAAN AYUU U EGYAHAY QAABKA NADAAMKA DIMUQORAADIGA AH

### DADKA



Dadka Iswiidhan ayaga ayaa dooranaya dadka u fariisanaya baarlamaanka

### DOORASHO AFARTII SANO MAR AH




### BAARLAMAANKA



Baarlamaanka ayaa sameeynaaya sharciyadda iyo sida lacagta doowlada loo isticmaalaayo

### DOOWLADDA IYO WASAARADAHA






Voteringsknappar i en ledamotsbänk.

Dowladda ayaa hogaamisa Iswiidhan ayadaana siisa lacag iyo shaqo hey'adaha dowladda

### WAKAALADAHA

### NATIIJADA.



**Hey'adaha dowladda ayaa xaqiijinaya in laga dhabeeyo go'aamada eey gaaraan baarlamaanka iyo dowladda**

# Howlaha gaarka ah iyo kuwa guud - waa maxay farqiga u dhaxeeya?

*Iswiidhan waxeey hawlaha kala duwan u qaybsan yihiin hawlaha guud iyo kuwa gaarka ah. Howlaha guud waxaa ka mid ah hawlaha lagu maalgeliso cashuuraha, oo waxaa hawlgaliya waxyaabaha guud. Halkaan waxaa ku jira hawlaha dawladda, laakiin sidoo kale waxaa ku jira hawlaha degmooyinka iyo gobollada.*

**Howlaha guud**

Howlaha guud waxaa ka mid ah hawlaha lagu maalgeliso cashuuraha, oo waxaa hawlgaliya waxyaabaha guud. Howlaha guud waxeey u qeybsamaan laba qeybood: hawlaha dawladda iyo hawlaha degmooyinka iyo gobollada.

**Howlaha dowladda**

Howlo ( howlo maamulxukuumeed, arrimaha quseeya dowladda) oo shaqada ka hela dowlada iyo barlamaanka si eey uga shaqeeyaan su'aalo cayiman oo sare u qaadaya isla markaana taageerid siinaya bulshada.

**Hawlaha degmooyinka iyo gobollada**

Howlo (iskoollada, habsami u socodka gaadiidka, caafimaadka iyo daryeelka iyo kuwo kale) kuwaasoo ka shaqeeya meelo cayiman oo bulshada ka mid ah. Waxaa jira kuwo badan oo saas oo kale ah si eey si wada jir ah u daboolaan baahida bulshada oo dhan.

### Howlaha dowladda

Halkaan waxaa la dhihi karaa in wakaaladaha dowladda shaqo cayiman ka helayaan dowlada iyo barlamaanka si eey uga shaqeeyaan su'aalo cayiman oo sare u qaadaya isla markaana taageerid siinaya bulshada. Hawlaha waxaa lagu maalgeliyaa cashuuraha. Howlaha dowladda eey qabato waxaa ka mid ah wakaaladaha maamulka sida xafiiska shaqada, shaqooyinka kaloo dowlada sida wakaalada hawada. Laakiin halkaan kuma jiraan shirkadaha dowladda eey leedahay sida Vattenfall, kuwaas waxey ka mid yihiin howlaha gaarka ah.

Dowladda waxaa u shaqeeya 286 000 oo shaqaale. Waxeey u dhigantaa 6% oo ka mid ah dadka shaqeeya ee wadanka oo dhan.

### Howlaha ama shaqooyinka degmooyinka iyo gobollada

Howlaha eey qabtaan degmooyinka waxaa ka mid ah iskoollada, caafimaadka iyo daryeelka iyo habsami u socodka gaadiidka.

Iswiidhan waxeey u kala qeybsantahay 290 degmooyin degma kastana waxeey leedahay gole degmo oo eey dadka degma doorteen, isla markaana go'aan ka gaara su'aalaha quseeya degmada. Howlaha waxaa lagu maalgaliyaa cashuuraha, khidmado iyo kaalmo dhaqaale oo eey dowladda siiso.

Iswiidhan waxeey leedahay 20 maamul-goboleed caafimaad, mid kasta oo ka mid ahna waxeey leedahay gole maamul-goboleed caafimaad oo eey dadka degma doorteen, isla markaana go'aan ka gaara su'aalaha quseeya caafimaadka maamul-goboleed. Howlahaas waxaa lagu maalgaliyaa cashuuraha, khidmadaha bukaankleyda iyo kaalmo dhaqaale oo eey dowladda siiso.

Shaqooyinka degmooyinka iyo gobollada waxaa ka shaqeeya dad gaaraya qiyaastii 1 098 100 oo shaqaale, taasoo u dhiganta 23 boqolkiiba dadka shaqeeya wadanka oo dhan.

**Howlaha gaarka ah**

Shirkado ama ururyo ujeedadoodu tahay ineey faa'iidaan. Waxaa jira tartamayaal soo saara ama haya adeegyo ama alaab isku mid ah.

### Howlaha gaarka ah

Shirkado ama ururyo ujeedadoodu tahay ineey faa'iidaan ayagoo tusaale ahaan tartamaya oo soo saaraya ama keenaya adeegyo ama alaab isku eg. Howlaha gaarka loo leeyahay (marka laga reebo howlaha guriga) waxaa loola jeedaa shirkadaha gaarka loo leeyahay. Badanaa waa ururyo looga shaqeeyo si faa'iido looga helo. Waxaa kaloo jira ururyo ka jirsan kuwa gaarka loo leeyahay oo aan loo sameynin in laga faa'iido waxaana loogu yeeraa howlaha iskaa wax u qabso.

Howlaha gaarka ah oo ah kan ugu weyn, wuxuu leeyahay qiyaas ahaan 3.403.500 oo shaqaale, kaas oo u dhigma 71 boqolkiiba kuwa ka shaqeeya suuqa shaqada.

# Qiimayn dowladeed oo wadajirka

*Qiimaayn waa shuruudaha qiimo ee uu salka ku hayo howlaha urur. Anageennaa ah shaqaale dowladeed, waxaan rabna aanba ka shaqeynee, waxaa na haga qiimeyn wadajir ah oo ku saleysan dimuquraadiyadnimo.*

*Qiimeyn dawladeedka wadajirka ah waxaa lagu soo koobi karaa lix qimeyn oo asaasi ah:*

## Dimuquraadiyada

Awoodda guud waxeey ka timaaddaa dadweynaha. Waxaan xaqiijineynaa in wixii eey dadka rabaan la sameeyo iyada oo loo marayo Baarlamaanka.

## Sharciyadda

Awoodda guud waxaa laagu dhaqmaa iyadoo sharciga la hoos keenayo. Waa in aan raacno sharciga iyo xeerarka quseeya shaqadayada.

## Dhexdhexaadnimada

Xukunka sharciga, dadka oo dhan weey kawada siman yihiin. Waxaan mas'uul ka nahay in kiisaska isku midka ah isku si loola dhaqmo iyo in go'aanka lagu salaysan waxa uu qofka go'aaminaya doonayo. Waa in aynaan aqbalin laaluush.

## Lahaanshaha fikrad xor ah

Dimuqraadiyadda dadka iswiidhishka ah waxay ku saleysantahay xornimo xagga ra'yiga ah. Xuriyatul qowlka iyo furfurnaanta waa muhiim. Waxaan xaq u leenahay inaan ka hadalno waxa ka dhacaya hey'adaha dowladda marka laga reebo waxyaabaha sirta ah.

## Ixtiraamka isla sinnaanta, xoriyada iyo sharafta

Awoodda gud ee dadweynaha waa in loogu dhaqmaa si ixtiraam leh iyadoo la eegayo sinnaanta dadka oo dhan iyo xoriyadda qofka iyo sharaftiisa. Waa in aan mar walba xushmaynaa isku si u qiimeynta dadka oo dhan iyo in aan qof takoorin anagoo ku saleyneyna tusaale ahaan jinsiga, qowmiyadda ama naafonimo.

## Karti iyo adeega bulshada

Kartinimada iyo maamulida khayraadka waa in lala jaanqaadsiiyo howl wanaag iyo in sahlan wax loo heli karo. Waxaan dadweynaha siin doonaa macluumaad, hagid iyo la talin. Annagu waxaan howlaheennu u oofin doonnaa si hufan.

# Ka shaqaynta hay'ad dawladeed

*Shaqaalaha Dawladda waxeey ka shaqeeyaan goobo kala duwan. Sawirka ku yaal bogga 11 ayaa muujinaya goobaha shaqo ee kala duwan goob kastoo ganacsina waxaa tusaale ahaan lagu siinayaa laba wakaalo dowladeed.*

## MAAMULKA GOBOLKA AYAA U KALA QAYBSAN TODOBO GOOBO SHAQO OO KALA DUWAN:

**Waxbarasho:** Hawshani waxaa ka shaqeeya shaqaale dhan 74 700 oo 41 hay'adood u kala qeybsama, tusaale ahaan, Jaamacadda Lund iyo Hey'adda qaabbilsan waxbarashada.

**Ammaanka iyo cadaaladda:** Hawshani waxaa ka shaqeeya 52 300 oo shaqaale oo hoos yimaada 14 hay'adood kuwaasoo ay ku jiraan Booliska iyo Maamulka baara Dambiyada Dhaqaalaha.

**Ilaalinta bulshada iyo waxa la hal maala:** Hawshani waxaa ka shaqeeya 41 600 oo hoos yimaada 19 hey’adood, sida Khasnadda caymiska bulshada iyo Hay'adda howlgabka.

**Maamulka howlaha guud:** Hawshani waxaa ka shaqeeya 28 200 oo shaqaale oo hoos yimaada 45 hay'adood, sida wakaaladda cashuuraha iyo xafiiska dowladda.

**Difaaca iyo ka hortaga masiibooyinka bulshada:** Hawshani waxaa ka shaqeeya 28 100 oo shaqaale hoos yimaada 13 hay'adood, oo ay ku jiraan hey’adda ilaalinta xeebaha iyo Hey’adda ka hortaga masiibooyinka.

**wax soosaarka ganacsiga iyo wershedaha:** Hawshani waxaa ka shaqeeya 25 000 oo shaqaale oo hoos yimaada 53 hay'adood, sida Hey’adda bii’ada deegaanka iyo Maamulka Gaadiidka qaranka.

**Madadaalada, hiddaha iyo dhaqanka iyo diinta:** Hawshani waxaaa ka shaqaysaa 2,500 shaqaale oo hoos yimaada 27 hay'adood, kuwaasoo ay ka mid yihiin Hey’adda xafidida iyo horumarinta hiddaha iyo dhaqanka iyo matxafka qaranka.

**Howlaha firfircoonida, hiddaha iyo dhaqanka iyo diinta**

Waxaan ka shaqeynaa inaan dhowrno, isticmaalno iyo inaan sare u qaadno dhaxlidda hiddaha iyo dhaqanka. Waan uruurineynaa, tuseynaa isla markaana waxaan dhowreynaa farshaxanka. [Swedhish national heritage board Riksantikvarieämbetet & Moderna Museet]

**Ilaalinta mujtamaca iyo cadaalada**

Waxaan ka shaqeynaa inaan yareeyno burcadnimada iyo inaan kor u qaadno amaanka bulshada. [Ekobrottsmyndigheten Swedish economic crime Authority & Polisen]

**Waxbarasho**

Jaamacada iyo machadjaamacadlayaasha waxbaan ku barnaa cilmi baarisna waa ku sameynaa iyo in xooga la saaro in qof kasta uu helaa waxbarasho isku mid ah iyo in tayo fiican eey yeeshaan waxbarashada iyo cilmi baarista. [skolverket, Lund universitet]

**Maamulida waxyaabaha wakaaladaha guud**

Waxaan ka shaqeynaa in cashuuraha si sax ah loo dhiibo iyo in qof kasta oo iswiidhan degan la galiyaa galka diiwaangalinta. Waxaan ka shaqeynaa inaan kor u qaadno tayada wakaaladaha dowladda. [statskontoret & Skatteverket]

**Socialt skydd med mera**

Vi betalar ut olika ersättningar till dig som är förälder, till dig med funktionsnedsättning, till dig som är sjuk och till dig som är pensionär.

**Wax soosaarka ganacsiga guud**

Waxaan cadaadis ku saarnaa goobaha shaqo oo dhan ineey jawi fiican u sameeyaan goobtooda shaqo. Waxaan ka shaqeynaa sida uu qof kasta u tagi karo meesha uu rabo si eey xasillooni ku jirto. [ arbetsmiljöverket, Trafikverket]

**Difaaca iyo bulshada qeybteeda ka hortaga xaaladaha adag**

Waxaan mas'uul ka nahay inaan bii'ada badbaadino iyo inaan ilaalino wadanka xeebihiisa. Waxaan gacan ka geysanaa haddii eey xaalado adag soo wajahaan meelo Iswiidhan ka mid ah iyo meelo kaloo aduunka ka tirsan. [ kustbevakningen, MSB Myndigheten för samhällsskydd och beredskap.

# Waa sidee in laga shaqeeyo hey’ad dowladeed?

## Shaqada

Qofka u shaqeeya dowladda waxuu kabaa barlamaanka dowlada shaqadooda. Marka aad ka shaqeeyneysid hay'ad dowladeed, waxaa muhiim ah in la ogaado in dadka reer Sweden (iyada oo loo maraayo baarlamaanka iyo xukuumadda) eey yihiin shaqa bixiyayaal iyo in shaqada aad qabaneysid lagu maal geliyo cashuur. Shaqada laga fuliyo hal hey’ad weey kala duwan tahay waxeeyna ku xirantahay hey’’d dowladeedka aad ka shaqeysid. Haddii aad xataa hal meel oo qura ka shaqeysid shaqada la qabanayo ayaa kala duwan.

### Ka shaqeynta hey’ad dowladeed – in adigoo matalaya hey’adda aad wax go’aamisid

Marka uu qof shaqaale dowladeed ah wax shaqada ku saabsan sameynayo, tusaale ahaan inuu go’aan ka gaaro kiis, waa waajib in qofkaas shaqaalaha ah ogaado sharciyada jira iyo sida loo isticmaalo. Mararka qaar waxaa dhici karta ineey tahay amar bixin ama in go’aan arrin laga garo, waa go’aamada eey hey’adda leedahay awood eey kaga sareeyso qofka caadiga ah. Tusaale ku saabsan arrintaan waa go’aan ogolaansho shey, bixinta khidmad, badalkeed wax siin ama waajibad kale. Markaas oo kale waa muhiim in shaqaalaha dowladda eey raacaan waxa uu sharciga dhigayo. (sharciga, qawaaniinta ama xeerarka).

### Maareynta sharciyada- sida shaqada loo sameeyaa

Waxaa jira shuruudo gaar ah oo khuseeya dhammaan shaqaalaha dawladda, tusaale ahaan sida kiisaska wax looga qabto - sida ugu fudud, ugu degdegsan iyo sida uugu wax oolsan ee suurtogalka ah, iyo in go'aanka leesku gaadhsiiyo hab la fahmi karo. Waxaa kaloo jira xeerar ku saabsan adeegyada, sida waajibka ah inuu shaqaalaha ka jawaabo su'aalaha ka yimaada dibadda. Shaqaalaha dowladda sidoo kale waa inay ahaadaan dhedhexaad, tusaale ahaan, inuu qofka ka shaqeyn kiis uu leeyahay qof uu garanayo ama qof eey qaraabo yihiin.

### Daacadnimada/furnaanta iyo qarsoodiga

Daacadnimada waa muhiim haddii aad ka shaqeysid xafiis dowladeed tusaale ahaan si aad uga hor tagtid laaluush. Sidaas darteed muhiimaddu waa in macluumaadka yaalla hey’adda eey yihiin kuwo guud oo la heli karo haddii uu qof codsado. Laakiin kiisaska qaarkood waxaa haga sharciyo sheegaya in shaqaalaha dowladda uusan waxba ka dhihi karrin kiiskaas isla markaana uusan qof aan shaqo ku laheyn u gudbin karin. Waxey tusaale ahaan noqon karaan macluumaad xasaasi ah oo ku saabsan xaalada caafimaad ee qof. Haddii uu qof shaqaale dowladeed ah uu saaran yahay waajibka sir xajinta waxuu waajibjaas saaran yahay marka uu shaqada ku jiro, marka uu la joogo shaqaale kale oo eey isla shaqeyan laakiin aana isku arrimo kawada shaqeyn iyo marka uu bannaanka ka joogo shaqada intaba.

## Goobta shaqada

In la ahaado shaqaale dowladed waxeey la mid tahay sida shaqooyinka oo kale marka laga hadlo inuu qofka maqsuud ku yahay goobta shaqada iyo shaqooyinka uu qabto. Inuu qofka heysto jawi shaqo oo wanaagsan waa wax ee dowladda qiimeyneeyso.

### Qaabka goobta shaqada

Sida eey u sameysantahay goobta shaqada waa muhim shaqa bixiyahaagana waxuu isku dayayaa inuu goobta shaqo ku habboontahay shaqada la qabanayo. Haddii uu qofka xafiis fadhiyo waxaa laga yaabaa inuu heysto miis kor iyo hoos loojuusteen karo haddii uu qofka bannaanka ka shaqeeyana waxaa caadi ah inuu qofka heysto dhar iyo qalab ku habboon shaqada isla markaana inuu qabto u fududeeya isagoon dhib u geysan jirka.

### Heshiis

Waxaa jira heshiis u yaal dowladda oo dhan laakiin waxaa kaloo jira sheshiiss u yal goob kasoo shaqo kaasoo sheegayo sida loo shaqeynayo, sida mushaarka loo xadido, sida fasaxa loo qaato iyo waxyaabo kale. Heshiiska waxaa loogu tala galay inuu saldhig u noqdo sida eey goobta shaqo ahaaneeyso si uu qof kasta u helaa fursad uu shaqo wanaagsan ku sameyn karo taasoo ah ah ineey jirto fursad xaga isku dheeli tirnaanta shaqada iyo xili firaaqaha. Heshiiska waxaa si wada jir ah u soo saaraya shaqa bixiyaha iyo ururka isku tagga shaqaalaha wadanka.

### Wadahadal lala sameeyo madaxda/maareeyaha guud

In aad si joogto ah wada hadal ula sameeysid sheefkaada waxaad u dulmareysaa sida aad u aragtid goobta shaqada. Waxyaabaha qaarkoos waxaaba ka yaal sharciyo dajisan oo sheegaya qawaaniinta ka jira goobta shaqada, laakiin la hadalka sheefka aad kala hadleeysid arrimaha ku saabsan shaqadaada, wada shaqeynta ito goolka aad tigsaneysid, waxaa saameyn kartaa sida shaqadaada aad u sameyneysid.

# In tababarte laga ahaado hey’ad dowladeed

*Haddii aad tahay tababarte ma tihid shaqaale laakiin shaqada aad sameyneysid iyo shaqaalaha aad la joogtid ayaa waxeey ku siineysaa sawir ah sida eey tahay in laga shaqeeyo hey’ad dowladeed. Waxyaabaha qaarkood weey ka duwan yihiin sida eey ahaan lahaayee haddi uu qofka shaqaale rasmi ah ahaan lahaay.*







**Waqtiga shaqada**
Badanaa waxaa laga yaabaa inaad goobta aad tababarka ka sameyneysid aad ka heshay xafiiska shaqada, marka waxaa laga yaabaa inaadan tababar sameyneynin waqti dhameystiran oo aad waxyaabo kale ka barbar sameyneysid, sida inaad luqadda iswiidhishka baraneysid ama inaad waxbarasho heshay adigoo usoo maray xafiiska shaqada.

Haddii aad tababarte tahay ma heleysid mushaar sida dadka shaqaalaha oo kale. Laakiin xafiiska shaqada ama qasnada ceymiska ayaa qarash cayiman ku siinaya markaad tabarka aadeysid.



**Shaqada**
Haddii aad tababrte tahay ma tihid shaqaale taasna waxeey ka dhigantahay in shaqooyinkaada ee kala duwan yihiin. Waxaad tijaabineysaa waxyaabo kala duwan laakiin tusaale ahaan ma xallineysid kiisas go'aan laga gaarayo. S

Hey'adda qorsheyneysa tababarka ayaa mas'uul ka ah bii'adaada shaqo. Marka arrintaas marka la eego ma jiraan wax farqi ah oo u dhaxeeya adiga iyo shaqaalaha hey'adda. Si kastaba tabarkaada ha ahaadee waa muhiim inaad sida qof shaqaale oo kale aad saameyn ku yeelataa sida eey shaqadaada iyo tababarkaad yihiin, inaad tusid inaad xiiseyneysid iyo inaad weydiisid waxa aad su'aalo ka qabtid.

**Gacan haye**
Laga billaabo maalinta koowaad waxaad yeelan doontaa gacan haye kaa caawiya inad la qabsatid goobta shaqada isla markaana kuu sheego sida eey tahay in laga shaqeeyo hey'ad dowladeed. Waxaad markaad rabtid su'aalo weeydiin kartaa qofkaas haddii aad su'aalo qabtid.



# Warbixin dheeraad ah

Boggeenna internetka ka akhriso macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida eey tahay in laga shaqeeyo xafiis dowladeed

**www.arbetsgivarverket.se/jobbastatligt**

MILJÖMÄRKT 341 376

Utgiven av Arbetsgivarverket 2016

Produktion: Arbetsgivarverket

Foto: Getty Images, sidan 6-7 och 8-9: Melker Dahlstrand/Riksdagsförvaltningen, sidan 8 voteringsknappar: Ingemar Edfalk/Riksdagsförvaltningen

Arbetsgivarverket

Arbetsgivarverket

Box 3267,103 65 Stockholm,
Besöksadress: Sveavägen 44

Växel: 08 700 13 00

www.arbetsgivarverket.se

registrator@arbetsgivarverket.se